# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Amiirkii Wabiga ka Yimid

Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: M. Maillot, Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot, Sarah S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.


Raysal was are Yuusuf
wuu geeriyooday!
Masaridii oo idil qoyskiisii
bay la baroorteen.

Yuusuf Ilaah waxa uu u isticmaalay Cibraaniyiintii inuu waddanka kaga badbaadiyo abaartii ba'neyd.



Xigmad buu lahaa oo hoggaamiye la jecel yahay buu ahaa. Iminka wuu tagay.

In ka badan saddex boqol oo sanadoo markii ay ka soo wareegatay. Dadkii Yuusuf, Cibraniyiintii, waxy noqdeen qowmiyad weyn oo tiro badan ku nool dadlka Masar.



Fircoonkii cusbaa Cibraaninyiinta tirade badan inay ka soo horjeestaan, deedna kuligoodba addoomo ayuu ka dhigtay.



Fircoonna si aad u xun buu ula macaamilooday Cibraaniyiintii.  Laaliinse waxba ma aysan ka bedelin sidii adkayd ee uu ula shaqeeyey iyaga, Cibraaniyiinta weyba sii tarmeen oo tiradoodii wey sii korodhay.




Maalin baa, Amar cabsi leh oo aad u xun ka soo saaray Fircoon. “Wiil kasta oo dhasha waa inaad webiga Niil ku tuurtaan.” Fircoonkan inkaaran wuxuu is yidhi sidaa bay ku yaraan kartaa tirade Cibraaniyiinta.



“Maxeynu samaynaa?” qoysbaa wax la yaab leh la yimid. Waxay go’aansdeen inay ilmahooda k tuuraan webiga Niil. Laakiinse wuxuu ku jiray abxad/dambiil adag oo aysn biyaha soo dhaafi karin.



Wey qaaday alaabtan qaaliga ah. Dambiishii doonta yarayd ahayd waxey sabaysan biyihii jiinka korkiisa. Wax walba oo ku dhacaba kara ilmahaa yar?



Meel fog, waxaa taagnayd walaashiisa iney ogaato dambiishaa qaaliga ah ee sida wanaagsan ugu dul sabaynaysa jirjirka caws duurka webiga qarkiisa.




Kolkiiba gabadhii Fircoon iyo addoomadeedii baa yimid wabiga si ay ugu maydhato. Waddo kale oo lagu qariyaan ma aysan jirin, laga yaabee inay garab socdeen iyagoon arkayn.

“Alla!  Waa dambiil, halkaa caws duurka.  Waxaan la yaabanahay waxa ku jira.”  Gabadhii Fircoon addoomadeedii bay ku amartay inay soo qabtaan dambiishaa.  Markii ay furtay  - limihii wuxuu bilaabay inuu ooyo.  “Waa ilmo yar Cibraani ah,” amiiradii wey sheegatay.



"Miskiinkan yarow, aad baad u qurux badan tahay." Aalaaba waxay ula hadashay ilmihii yaraa sida dadka waaweyn ay ula hadlaan caruurta oo kale. Iney sidan tidhi laga yaabaa "Ootchie-kootchie Koo-ums"- Afkii Masaarida, weeye.



Ilaah baa xikmad gaar ah siiyey ilmihii yaraa walaashii waxay ku oroday gabadhii Fircoon. “Ma kuugu yeedhaa naagaha Cibraaniyadda middood si ay kuugu nuujiso?” “Haayoo iigu yeedh.” Bay ku tidhi qofkee buu kula yahay ka naas nuujin doona ilmaha?




"Hooyo! Dhakhsa u soo orod! Alla soo horey carar!" laga yaabee inanata inaysan haysan wakhti ay ugu sharaxdo. Wadajir bay dib ugu soo daadageen raadkii.



Dib bay ugu soo noqdeen webigii, iyadoo gabadhii Fircoon ilmihii kor u haysata. "Ii nuuji isaga. Lacag baan ku siin doonaaye, Waxaa loo bixiyey Muuse." Lagayaabe Muuse inuu la micne yahay xagga Masaarida wiilkii biyaha.



Haddaba Muuse waxa uu dib ugu soo noqday waalidiintiisii iyo xaafaddii. Waxay bareen inuu jeclaado Ilaah iyo dadka Cibraaniyiinta.  Durbadiiba waxay ahayd inuu ku noolaado meeshii ay joogtay gabadhii Fircoon. Ilaaha samata bixiyey noloshiisa, mustaqbalka waxbuu u qorsheeyey ilamahan Muuse ah.





# Amiirkii Wabiga ka Yimid

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Baxniintii 2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130


Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16